# SOMALIA CAPACITY ADVANCEMENT, LIVELIHOOD AND ENTREPRENEURSHIP, THROUGH DIGITAL UPLIFT PROGRAM

# (SCALED-UP)

# QORSHAHA KA QAYBGALINTA DANEEYAYAASHA

**APRIL 2022**

## TUSMADA


**1 HORDHAC ... 3**

1.1 QEEXIDDA MASHRUUCA ... 3
1.2 QORSHAHA KA QAYBGALINTA DANEEYAYAASHA ... 4
1.3 UJEEDOOYINKA QORSHA KA QAYBGALINTA DANEEYAYAASHA ... 4
1.4 MABAADI'DA KA QAYBGALINTA DANEEYAYAASHA ... 4
1.5 SHURUUDAHA BANGIGA ADDUUNKA EE KA QAYBGALINTA DANEEYAYAASHA ... 5

**2 SHAACINTA MACLUUMAADKA ... 6**

**3 MAS'UULIYADDA FULINTA HAWLAHA DANEEYAYAASHA ... 6**

**4 HABKA XALINTA CABASHADA ... 6**

4.1 MABAADI'DA HABKA XALINTA CABASHADA ... 6
4.2 GEEDDISOCODKA HABKA XALINTA CABASHADA ... 7

**5 KORMEERKA IYO WARBIXINTA ... 7**

5.1 KORMEERKA ... 7
5.2 WARBIXINTA ... 8

# Hordhac

## 1.1 Qeexidda Mashruuca

Soomaaliya ayaa weli ah dal nugul oo ka soo kabanaya dhibaatooyinkii dagaalada sokeeye, inkasta oo horumar la taaban karo laga sameeyay sannadihii u dambeeyay si dhidibbada loogu aaso xasillooni iyo horumar. Laga soo bilaabo 2011, Soomaaliya waxay hiigsanaysay horumar joogto ah oo dhanka siyaasadda, dhaqaalaha, iyo amniga la xiriira, waxaana daliil u ah in dalku uu gaaray nidaam go'aan lagaga gaarayo oo xoojinaya hindisaha horumarinta dalalka saboolka ah ee deymaha badan lagu leeyahay bishii Maarso 2020. Hase yeeshee, caqabado la taaban karo ayaa weli taagan, oo ay ka mid yihiin go'doominta dhaqaalaha, dib-u-heshiisiinta, dib-u-habeynta laamaha amniga, nafaqo darro baahsan, abaaro soo noqnoqda, iyo saboolnimo xooggan. Miisaaniyadda xadidan ayaa sidoo kale caqabad ku ah adeegyada ay bixiso Dowladda Federaalka Soomaaliya taasoo keentay in kalsoonida lagu qabo dowladnimada hoos u dhacdo, sidoo kale waxaa cudurka COVID-19 uu sii xoojiyey caqabadaha ka jira dalka iyo isbeddelka cimilada oo soo noqnoqda (daad iyo abaaro).

Ganacsiga gaarka loo leeyahay oo hormuud u ahaa kobaca dhaqaalaha iyo shaqo abuurka Soomaaliya ayaa waxaa siyaabo kala duwan u saameeyay faafitaanka COVID-19. Sidoo kale waxaa saamaynta ka mid ahaa bandowga iyo xannibaadaha carqaladeeya hawlaha ganacsiga, kororka dayaca ku yimid ganacsiga, culays ku yimid keenidda saadka muhiimka ah, xuduudaha xiran, hoos u dhaca raasamaal iyo qulqulka ganacsi, iyo hoos u dhac ku yimid helitaanka maaliyadda.

Mashruuca SCALED-UP wuxuu samayeeyay horumar la taaban karo tan iyo markii la hirgeliyay wuxuuna kaalin dhexe ka qaadanayaa xoojinta awoodda dowladda si ay wax uga qabato caqabadaha uu keenay xanuunka COVID-19. Guud ahaan, mashruucan ayaa lagu qiimeeyay 'Mid lagu qanacay' marka la eego gaaritaanka Ujeeddada Horumarinta Mashruuca iyo 'qanaacsanaan dhexdhexaad ah' xagga Hirgelinta

Mashruuca. Mashruuca wuxuu codsaday maaliyad dheeri ah si sare loogu qaado hawlaha mashruuca SCALED-UP dowladdana ay ugu taageerto soo kabashada qoysaska iyo ganacsiyada uu saameeyay masiibada COVID-19. Hawlaha uu mashruuca u adeegi doono waxaa ka mid ah; (I) Ballaarinta helitaanka maaliyadda ee ganacsiyada yaryar iyo kuwa dhexe, iyo (II) Dardargelinta dib-u-habaynta muhiimka u ah kobaca ganacsiga, xoojinta kabashada iyo ilaalinta hab-nololeedka gaar ahaan haweenka iyo ganacsiyada ay haweenku leeyihiin. Ujeedka maaliyadda dheeraadka ah waxay tahay in looga faa'iidaysto mashruuca xoojinta hay'adaha maaliyadda iyo horumarinta adeeg bixinta si ay awood u siiso in ka badan 5,000 ganacsi yaryar iyo dhexdhexaad ah kuwaas oo helaya dhaqaale si ay dib ugu dhistaan ganacsigoodii mid ka sii wanaagsan. 5,000 ganacsi ayaa si rasmi ah loo diiwaangelin doonaa oo lagu taageerayo in ka badan 250,000 oo haween ah si ay u helaan xisaabaad

maaliyadeed, sidoo kale wuxuu mashruuca taageerayaa saddex milyan oo qof oo Soomaali ah oo heli doona kaar aqoonsi oo gaar ah.

***Mashruucu wuxuu yeelan doonaa saddex qaybood oo hoos ku xusan;***

- ***Qaybta 1aad;*** *Xoojinta Hay'adaha*
- ***Qaybta 2aad;*** *Awood siinta maaliyadda iyo adeegyada digitaalka ah*
- ***Qaybta 3aad;*** *Maaraynta iyo Isu-duwidda Mashruuca*

## 1.2 Qorshaha Ka Qaybgalinta Daneeyayaasha

Dukumeentigan wuxuu qeexayaa qorshaha ka qaybgalka daneeyayaasha ee SCALED-UP. Ka qaybgalka daneeyayaasha waxa loo la jeedaa nidaamka wadaagista macluumaadka iyo xogta, iyadoo la rabo in la fahmo oo laga jawaabo dareenka shakhsiyaadka suurtagalka ah ee saameynaya mashruuca, si hufan oo daahfurnaan leh, loona dhan yahay, lehna hab waqtiyeysan iyo dhisidda xiriir ku saleysan kalsooni.

Qorshaha ka qaybgelka daneeyayaasha waxaa lagu saleeyay qaab dhismeedka sharci ee tixraaca u ah Hannaanka Maamulka Deegaanka iyo Bulshada (EMSF) ee uu Bangiga Adduunka u sameeyay Wasaaradda Maaliyadda Janaayo 2019 qaybna ka ah mashruuca SCALED-UP iyo Badbaadada Deegaanka iyo Bulshada ee Bangiga Adduunka.

## 1.3 Ujeedooyinka Qorshaha Ka Qaybgal Daneeyayaasha

***Ujeedooyinka ugu waaweyn waa sidan soo socota;***

- Si loo siiyo daneeyayaasha nidaam cad oo ay ku soo gudbiyaan cabashooyinka;
- Si loogu ogolaado daneeyayaasha fursad ay ku soo gudbiyaan faallooyin ama cabashooyin qaab qarsoodi ah iyagoo isticmaalaya khadadka taleefoon ee jira;
- Si loo habeeyo loona maareeyo faallooyinka, jawaabaha iyo cabashooyinka, lala na socod waxtarka habka la adeegsanayo;
- Si loo hubiyo in faallooyinka, jawaabaha iyo cabashooyinka loona maareeyo si caddaalad ah oo daah-furan leh iyadoo la raacayo waxqabadka ugu wanaagsan iyo filashada Bangiga Adduunka.

## 1.4 Mabaadi'da Ka Qaybgalka Daneeyayaasha

Ka qaybgalka daneeyayaasha waxa ay noqon doontaa mid ka xor ah wax is-daba-marin, faragelin, caga-jugleyn iyo jujuub, waxaana lagu qabanayaa waqti munaasab ah, faham qumman, macluumaadka la heli karo iyo qaab ku habboon dhaqan ahaa. Waxaa ku lug yeelan doona dad gaar ah oo la xulay iyadoo la siinayo fursad ay ku soo bandhigaan walaacyada iyo fikradaha iyo hubinta in

macluumaadka la bixiyay lagu saleeyay go'aan qaadashada. Ka qaybgalka daneeyayaasha ee wax-ku-oolka ah wuxuu horumarinayaa kalsoonida, ixtiraamka iyo xiriirka hufan ee u dhaxeeya mashruuca iyo daneeyayaasha. Sidaa awgeed waxay wanaajinaysaa go'aan qaadashada iyo waxqabadka mashruuca si ay u maareyso khataraha, ka fogaanshaha isku dhaca, kor u qaadida sumcadda iyo filashada daneeyayaasha.

***Mabaadi'da guud ee ku salaysan dhaqanka ugu wanaagsan ee wax-ku-oolka ah waa:***

- Daah-furnaan ayaa la muujin doonaa marka walaaca daneeyayaasha wax looga qabto waqti ku habboon;
- Kalsoonida waxaa lagu gaaraa wadahadal furan oo macne leh oo ixtiraamaya korna u qaadaya qiyamka iyo ra'yiga daneeyayaasha;
- Daacadnimadu waxay imaanaysaa marka ka qaybgalka loo qabto si loo kobciyo ixtiraam iyo aaminaad labada dhinac ah;
- Ixtiraamka ayaa sare loo qaadi doonaa marka la aqoonsado xuquuqaha, dhaqanka iyo qiyamka danaha daneeyayaasha;
- Ka qaybgalka loo dhan yahay ayaa la gaari doonaa si loo dhiirigeliyo lana taageero fursadaha ka qaybgalka habboon.

## 1.5 Shuruudaha Bangiga Adduunka Ee Ka Qaybgalka Daneeyayaasha

Mashruucan waxaa lagu diyaariyey hannaanka deegaanka iyo bulshada ee Bangiga Adduunka (ESF). Sida ku cad Heerarka Deegaanka iyo Bulshada (ESS10) ee ku saabsan ka qaybgalka daneeyayaasha iyo shaacinta xogta, hay'adaha fulinaya waxaa looga baahan yahay inay siiyaan daneeyayaasha macluumaadka wakhtiga ku habboon, la fahmi karo oo la heli karo, kalana tashadaan iyadoo xor ka ah. wax is daba marin, faragelin, jujuub, takoorid iyo caga jugleyn. Ka qaybgalka daneeyayaasha ee waxtarka leh waxay wanaajin kartaa hagaajinta deegaanka iyo bulshada ee waaritaanka mashaariicda, waxay kale oo ay wanaajisaa aqbalaadda mashruuca, waxayna gacan weyn ka geysan kartaa naqshadeynta iyo hirgelinta mashruuca guuleysta.

Ka qaybgalka daneeyayaasha waa hannaan loo dhan yahay oo la qabto inta uu socdo wareegga geeddisocodka mashruuca. Marka si sax ah loo qaabeeyo oo loo hirgeliyo, waxay taageertaa horumarinta xooggan, wax dhisid, iyo jawaab celin kuwaas oo muhiim u ah maaraynta guusha leh ee khatarta deegaanka iyo bulshada ee mashruuca. Ka qaybgalka daneeyayaasha waxa ay aad wax-ku-ool u yihiin marka la bilaabo marxaladda hore ee habka horumarinta mashruuca waana qayb muhiim ah oo ka mid ah go'aannada mashruuca hore iyo qiimaynta, maamulka, iyo la socodka saamaynta iyo khatarta mashruuca kaga iman kara deegaanka iyo bulshada.

***Shuruudaha looga baahan yahay ka qaybgalka daneeyayaasha waa sida soo socota:***

- In la sameeyo hab nidaamsan oo ku aaddan ka qaybgalka daneeyayaasha taasoo ka caawinaysa Amaah-bixiyayaasha inay aqoonsadaan daneeyayaasha oo ay la yeeshaan xiriir wax dhisaya;
- Qiimaynta danaha daneeyayaasha iyo taageerada mashruuca oo awood u siinaya in qaabaynta mashruuca laga talogeliyo daneeyayaasha;
- Kor u qaadidda iyo bixinta nidaam wax-ku-ool ah oo loo wada dhan yahay oo lala yeesho dhinacyada mashruuca saameeyay inta lagu jiro geeddisocodka mashruuca; iyo
- Hubinta in macluumaadka mashruuca ku habboon loo siidaayo daneeyayaasha wakhti munaasib ah, la fahmi karo, lana heli karo.

## Shaacinta Macluumaadka

Macluumaadka mashruuca waxaa lala wadaagi doonaa daneeyayaasha iyadoo la adeegsanayo nidaam ku habboon. Waaxda fulinta mashruuca ayaa mas'uul ka noqon doonta hubinta in macluumaadka loo sheegay daneeyayaasha waqti munaasib ah. Jawaab celinta la helo waxaa lagu dari doonaa dukumeentiyada mashruuca si loo hubiyo in loo wada dhan yahay.

Dukumeentigan waa mid furan waxaana laga yaabaa in wax laga beddelo oo lagu daro xog cusub iyo soo jeedin ka timid daneeyayaasha.

## Mas'uuliyadda Fulinta Hawlaha Daneeyayaasha

Waaxda fulinta mashruuca waxay leedahay mas’uuliyad toos ah iyo mid guud ee fulinta iyo cusboonaysiinta joogtada ah ee hannaanka ka qaybgalka daneeyayaasha oo ay ku jiraan fulinta iyo kormeerida ka qaybgalka dhammaan daneeyayaasha ee la xiriira mashruuca, waxayna hubisaa in hawlaha la qorsheeyay loo qabtay si wax-ku-ool ah iyo heer ku habboon. Dadka mas'uulka ka ah ee ku jira waaxda fulinta mashruuca ayaa isku dubaridi doona baahinta macluumaadka mashruuca; hawlaha la tashiga dadweynaha iyo maaraynta habka xallinta cabashooyinka.

## Habka Xalinta Cabashada

***Mabaadi’da Habka Xalinta Cabashada***

Habka xallinta cabashada waxa uu fududeeyaa xalinta tabashooyinka ka yimaada daneeyayaasha deegaan ahaan iyo bulsho ahaan ay u saamaysay mashruuca. Habkan waa in si guud loo shaaciyaa oo la heli karaa inta lagu jiro marxaladaha hawlgalka ee mashruuca, iyo in ay isticmaalaan dhammaan daneeyayaasha ay khusayso iyo qandaraaslayaasha.

Daneeyayaasha waxaa lagu wargelin doonaa habka xalinta cabashada inta lagu guda jiro la tashiyada, waxaana la gaarsiin doonaa oo la siin doonaa dhammaan daneeyayaasha iyo gaar ahaan dadka nugul ee qaba baahiyaha gaarka ah.

Cabashooyinka waa in la helaa, la duubaa/qoraa oo loo wajahaa si fudud oo la heli karo, fahmi karaan daneeyayaasha ay khusayso. Marka ay suurtogal tahay oo ku habboon tahay mashruuca, habka cabashada waxa laga yaabaa in uu isticmaalo hababka cabashooyinka rasmiga ah iyo kuwa aan rasmiga ahayn ee jira, kuwaas oo taageeri doona talooyinka la soo jeediyay ee mashruuca u gaarka ah. Shaqaalaha mashruuca u go'ay ee xalinta cabashooyinka waxay noqon doonaan kuwa joogto ah, waayo-aragnimo u leh oo u qalma inay xaliyaan.

Tabashooyinka si degdeg ah ayaa wax looga qaban doonaa, iyadoo la adeegsanayo hannaan hufan oo si sahal ah u heli karaan dhammaan qaybaha ay khusayso iyadoo aan wax kharash ah ka bixin. Cabashooyinka la helo iyo jawaabaha la bixiyo waxaa dib loogu soo sheegi doonaa bulshada.

Shaqaalaha mashruuca waxa ay yeelan doonaan khibrad ama loo tababbari doona in ay xal u raadiyaan cabashooyinka qaab wada jir ah oo ay ka qayb qaadanayaan daneeyayaasha ay khusayso, iyadoo la tixgelinayo hababka dhaqanka iyo kuwa soo jireenka ah ee xallinta khilaafaadka, oo aan caqabad ku ahayn helitaanka garsoor ama maamul ee ka jira dalka. Habka waxaa ka mid ah dhinaca dib-u-hagaajinta si kuwa dareemaya in tabashadooda aan wax laga qaban, ay u la tashadaan cid kale oo ay ku qanacsan yihiin si ay dib ugu eegaan kiiskooda.

Mashruucu wuxuu siin doonaa ikhtiyaar cabashooyinka qarsoodiga ah oo ay ku jiraan cabashooyinka shaqaalaha taasoo ilaalinaysa in la aqoonsado.

***Geeddisocodka Habka Xalinta Cabashada***

Mashruuca SCLED UP wuxuu fuliyaa habka xalinta cabashada ee goonida ah iyadoo laga bilaabayo helitaanka cabashooyinka ilaa xalinta oo ay ku jirto dabagalka cabashooyinka. Geeddisocodka habka xalinta cabashada waxa kale oo ka mid ah shaqaalaha la magacaabay iyo guddiga maareynta cabashada iyo kormeerka (diiwaangelinta cabashada la soo gudbiyay lana xaliyay).

## Kormeerka iyo Warbixinta

***Kormeerka***

La socodka hawlaha ka qaybgalka daneeyayaasha ayaa muhiim ah si loo hubiyo in wada tashiyada iyo dadaalada shaacintu ay noqdaan kuwa wax-ku-ool ah gaar ahaana in daneeyayaasha si macno leh loola tashaday intii ay socotay hawsha. Korjoogteynta waxay sidoo kale u ogolaataa mashruuca inuu hagaajiyo xeeladihiisa iyadoo la isticmaalayo macluumaadka laga helay hawlaha kormeerka.

*Mashruucu waxa uu la socon doonaa hawlaha ka qaybgalka daneeyayaasha:*

- Hirgelinta qorshaha ka qaybgalka daneeyayaasha;
- Waxtarka habka ka qaybgalka ee maaraynta saamaynta iyo filashada iyadoo la raacayo jawaabaha laga helay hawlaha ka qaybgalka;
- La tashiyada iyo hawlaha shaacinta ee lala sameeyay daneeyayaasha; iyo
- Dhammaan cabashooyinka la helay lana xalliyey hadday yihiin kuwo aan la garanayn ama mid aan qarsoodi ahayn.

*Waxqabadka waxaa lagu qiimeyn doonaa sannadkiiba laba jeer iyadoo la raacayo:*

- Goobta iyo waqtiga ka qaybgalka rasmiga ah iyo heerka ka qaybgalka daneeyayaasha gaarka ah;
- Tirada iyo nooca cabashada iyo waqtiga xalintooda;
- Habka loo faafiyay, inta jeer iyo goobta;
- Tirada faallooyinka khuseeya mawduuc iyo daneeyayaasha, iyo faahfaahinta jawaab celinta la bixiyay; iyo
- Dabeecadaha iyo aragtida bulshada ee ku wajahan mashruuca ee ku salaysan warbixinnada warbaahinta iyo jawaab celinta daneeyayaasha.

***Warbixinta***

Waaxda hirgelinta mashruuca waxay soo saari doontaa warbixinno joogto ah (sida caadiga ah saddexdii biloodba mar) kuwaas oo sida caadiga ah looga baahan doono Bangiga Adduunka iyo Wasaaradda Maaliyadda. Warbixinadu waxay soo bandhigi doonaan dhammaan hawlaha, oo ay ku jiraan hawlaha ka qaybgalka daneeyayaasha ee soo koobaya muddada. Warbixinta iyo lifaaqyadeeda ayaa sidoo kale faahfaahin doona tallaabooyinka la qaaday si wax looga qabto arrimaha, waqtiga jawaabaha, iyo sidoo kale tallaabooyinka sixitaanka iyo yaraynta si wax looga qabto cabashooyinka iyo falanqaynta isbeddellada.

*Xogta laga soo gudbinayo waxaa ku jiri doona hawlaha soo socda:*

- Qaybinta iyo shaacinta macluumaadka;
- Ogaysiisyada guud iyo hawlgelinta warbaahinta;
- Shaacinta iyo shirarka wadatashiga; iyo
- Ururinta iyo isku darka faallooyinka iyo falcelinta.